Pediatric Services

Magaca Bukaanka: ______________________________

Taariikhda Dhalashada Bukaanka: __________________

# Oggolaanshaha Guud

**Oggolaanshaha Daaweynta**

Waxaan oggolahay oo aan idan ku siinayaa dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka ee Pediatric Services, PA in ay ilmahayga u sameeyaan baarista caafimaadka, daawada, baarista xanuun-helidda ama maamulka daaweynta hadba sidii loogu baahdo caafimaad ahaan. Waxaan ogahay in ay ku jirto xoogaa khatar ah daaweyn kasta iyo hawlaha caafimaadka oo waxaan fahamsanahay inuusan jirin qof dammaanad ka qaadi kara sida ay noqon doonaan daaweynta iyo hawlaha caafimaadka.

Pediatric Services, PA waa isbitaal tababar lagu qaato. Intaas waxaa sii dheer, dhakhtaariirta iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka waxaa la shaqeeya xirfadleyaal kale oo tababarid u yimaada. Shaqaalaha tababarka waxaa hagaya dhakhaatiir iyo xirfadleyaal leysan haysta.

**Hawsha Ceymiska/Lacagbixinta ee Adeegyada**

Waxaan oggolahay lacagbixinta wax kasta oo loo qabto Pediatric Services, PA. Waxaan ogahay in waalidka laga qaado lacagta qaarkeed marka loo sameeyo dareeylka qeybta aysan bixineyn ceymiska, qorshaha caafimaadka, ama dowladda. Waxaan ogahay in aan isbitaalka Pediatric Services, PA kala hadli karo sidaan u bixin karo daryeelkeyga. Waxaa ka mid ah raadsashada kharashka baaqiga noqda. Haddii aan haysto wax ka badan hal ceymis, isbitaalka Pediatric Services, PA dib ayuu ugu celinayaa lacagta dheeraadka noqota. Haddii la iga bixin waayo lacagta Pediatric Services, PA, wixii kharash ah waxaa lagu darayaa lacagta la igu leeyahay. Haddii ay jirto lacag ka soo hareysa marka la bixiyo kharashka ilmaha, aniga ayey i siin doonaan Pediatric Services, PA.

**Wadaagista Macluumaadka Daaweynta, Bixinta Lacagta iyo Hawlaha Caafimaadka**

Waxaan oggolahay oo aan raalli ka ahay Pediatric Services, PA in ay adeegsadaan oo ay hawlaha caafimaadka awgood u wadaagaan macluumaadka caafimaadka **daaweynta**, **lacagbixinta**, iyo **agaasinka daryeelka**, iyo qiimeynta tayada si loogu sii hagaajiyo adeegyada. Wadaagista xogta ee ujeeddooyinkaas waxaa loo gudbin karaa xirfadleyaal ku lug leh ama ka tala bixinaya arrimaha daaweynta, shirkadaha ceymiska, qorsheyaasha caafimaadka, daawada toos loogu dirayo farmashiyaha, adeegyada qofka dadka hagaya, ceymisyada lacagta bixinaya, sida goobaha daaweynta isku dhafan iyo/ama goobaha daryeelka ee dhakhaatiirta, iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka ee ka qeybqaadan doona daryeelka iyo daaweynta. Pediatric Services, PA ayaa ka qaadi kara wixii ah sawirro iyo/ama muuqaallo ee la qaado inta lagu jiro daryeelkaaga caafimaadka oo waxaa loo isticmaali karaa daryeelka, qiimeyn ah tayada iyo sida wax loogu sii hagaajin karo iyo waxbarasho la xiriirta caafimaadka. Intaas waxaa sii dheer, waxaan oggolahay oo aan idin ku bixinayaa shirkadda ceymisku in ay macluumaadka caafimaadka xafidan meelo kale ula sii wadaagto ujeeddooyinka kor ku qoran Pediatric Services, PA iyo/ama goobaha caafimaadka isku dhafan ama goobaha la xisaabtama xarumaha daryeelka ee ay Pediatric Services, PA qeybta ka yihiin.

**Xuquuqaha Bukaanka iyo Dhowridda Xogta**

Xuquuqaha dhowrista xogta shakhsiyeed ee adiga iyo qoyskaaga waxaa lagu dhejiyey goobaha muhiimka ah ee Pediatric Services, PA. Saxiixaagu waa xaqiijin ah helista Ogeysiiska Bukaanka iyo Adeegsiga Xuquuqaha Shakhsiyeed. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriira xuquuqaha iyo/ama adeegsiga xogta, fadlan kala xiriir shaqaalaha caafimaadka ama Pediatric Services, PA Xafiiskooda Xogdhowridda.

**Meelaha Kale ee Saddexaad ee Loo Oggolaaday in ay Yeelaan Daaweynta**

Marka lagu daro masuuliyiinta sharciga ah ee bukaanka, dadka soo socda ayaa loo oggolaaday in ay yeelaan daryeelka caafimaadka ee lagula taliyo ilmahayga (tusaale, awoowaha, shaqaalaha xannaanada, iwm.):

| Magaca: | Waxay ilmaha isku yihiin: |
|---|---|
| 1.________________________ | ________________________ |
| 2.________________________ | ________________________ |

**Oggolaanshaha Taleefanka Gacanta**

Haa, Pediatric Services, PA waxay taleefankeyga u soo garaaci arrimaha daryeelka, daaweynta, adeegyada iyo farriimaha horay loo duubay, taleefan si toos ah loogu garaaco habka garaacista iyo/ama farriimaha taleefanka ee qoraalka ah. Farriinta qoraalka ah iyo isticmaalka daqiiqadaha markay lacag yihiin adigaa masuul ka ah. Waxaan ogsoonahay farriinta ah codka ama farriinta qoran in aan la isku hubin helistooda oo bixinta oggolaanshahan shuruud uma aha daaweynta.

Saxiixayga macnahiisu waa in aan akhristay oo aan fahmay macluumaadka halkan ku qoran. Oggolaanshahan wuxuu shaqeyn doonaa ilaa hal sano laga bilaabo taariikhda saxiixa oo sida looga noqon karo waa hab ah qoraal oo keliya (waraaq ama boostada intarnetka).

**Magaca Bukaanka Far Waaweyn:**___________________________

**Magaca Waalidka/Masuulka Far Waaweyn:** ___________________________

**Saxiixa Bukaanka/Waalidka/Masuulka:** ___________________________**Taariikhda:**_________________

**Waxaad u Tahay Ilmaha:**___________**Magaca Turjubaanka (haddii loo yeeray):**_____________________

**Far Waaweyn Cinwaanka Boostada Intarnetka Waalidka (Email):**_____________________________

**Oggolaansho ah taleefanka oo la maqashiiyey (Magaca/Taariikhda/Xilka):**_____________________________